
## Ma runbaa mise waa been in wax kasta oo warbaahintu sheegto in ay run yihiin?

Wax kasta oo warbaahintu ay sheegto ama qorto markasta run ma ahan. Guud ahaan wararka ama xogaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo waa kuwo sugan. Waana suuragal in mararka qaar la tabiyo war khaldan ama been ah.




## Ku xirnow warbaahin lagu kalsoonaan karo.

Marka laga hadlayo run ama been ahaanshaha xogaha, waxaa muhiim ah in la isweydiiyo "horta yaa soosaaray xogta?. Sidoo kale ma la raadraaci karaa?. Wararka iyo xogaha warbaahinnaha lagu kalsoonaan karo ay soosaaraan waa kuwo sugan lana raadraaci karo.

**Kala aqoonso ilaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo iyo kuwa kale!**

# KOBCI AQOONTAADA LA XIRIIRTA FAHAMKA WARBAAHINTA!

## Ma runbaa mise waa been in wararka warbaahinta lagu kalsoonaan karo faafiyaan in la raadraaci karo?

Wararka iyo xogaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo ay faafiyaan waa kuwo ay weheliyaan akhbaarta cidda qortey ama meesha laga soo xigtay. Warkaas ama xogahaas waa la raadraaci karaa, hadday wax khaldamaanna waxaa laga codsan karaa iney saxaan, waana lagu dacweyn karaa wixii gaf ah.

**Warbaahinta lagu kalsoonaan karo waxay leeyihiin masuuliyad.**

Goorma ayey aheyd markii kuugu dambeysay ood ka shakiso xaqiiqo ahaanta xog warbaahintu faafisay?. Waa muhiim in qofku wada akhriyo wararka ama xogaha soo gaara, iskana hubiyo cidda soosaartey inta uusan qof kale la wadaagin.

**Wararka iyo akhbaaraadka saxan waxay leeyihiin raadraac!**

## Ma runbaa mise waa been in dhexdhexaadnimo la'aanta warbaahintu ay tahay mid si fudud lagu garan karo?

Badanaa way adag tahay in la garto dhexdhexaadnimo la'aanta warbaahinta. Maadaama oo dhexdhexaadnimadu ay muhiim u tahay aaminaada xogta. Qofka warka helaya ayaa laga rabaa in xogaha uu helayo uu ka hubiyo ilo-wareedyo kala duwan inta uusan dhinac la safan ama aaminin.

## Dhexdhexaadnimadu waxay qeyb weyn ka tahay aaminaada.

Waxyaabaha la tabinayo waxay noqon karaan war, xayeysiis, fikir-dhiibasho, ogeysiis, dood, digniin, xog ama wax kale? suurtagal ma tahay in waxa la tabinayo in la rabo in dareenkaaga lagu saameeyo ama lagu kiciyo si warkaas aad dad kale ula sii wadaagto?

**Dhexdhexaadnimadu waa muhiim si qiimeyn sax ah loo helo!**

## Ma runbaa mise waa been in aragtida iyo qiimeeynta qofku in saameyn ay ku yeelan karaan fahamka warka?

Aragtida iyo fahamka qofku saameyn weyn ayey ku yeelan karaan fahamka wararka ama xogaha qofka soo gaarta. Akhbaar walba oo ku soo gaarta adigu marka hore qiimeyn ku samee in waxaasi suuragalyahay iyo in kale kadibna wixii shaki kaa galo ku samee raadraac.

## Marwalba qiimeyn ku samee wararka ku soo gaara.

Ka feker, goorma ayey aheyd markii kuugu dambeysay ee waxyaabo warbaahintu faafisay ay dareenkaaga kiciyaan? Badanaa wararka ama xogaha shucuurta qofka kiciya waa kuwo been noqon kara, ka taxadar oo hubi.

**Aragtida qofku saameyn ayey ku yeelan kartaa fahamka warka!**

# KOBCI AQOONTAADA LA XIRIIRTA FAHAMKA WARBAAHINTA!

## Ma runbaa mise waa been in qofna aysan mas'uuliyad ka saareyn hubinta xaqiiqo ahaanta xogaha warbaahintu tabiso?

Qof walba oo naga mid ah waxaa saaran masuuliyad ah inuu hubiyo run ama been ahaanshaha waxa warbaahintu tabinayso ee soo gaara ama loo soo diro, inta qofku uusan cid kale la wadaagin. Waajibaadkaas wuxuu saaranyahay qofka, sidoo kale tabiyaha ama soosaaraha warka.

**Masuuliyadda ah in la soo tabiyo xog sugan waxaa laga rabaa soosaaraha.**

Adiga goorma ayaa kuugu dambeysay in xogaha aad helayso aad ka hubiso ilo-wareedyo kala duwan?. In qofku uu ilo-wareedyo kala duwan ka hubiyo sugnaanta xogaha uu helayo waxay muhiim u tahay aaminaadda xogta.

**Qof walba masuuliyad ayaa ka saaran hubinta warka uu helo!**

# KOBCI AQOONTAADA LA XIRIIRTA FAHAMKA WARBAAHINTA!

**Ma runbaa mise waa been in ilaha wararka beenta ah soosaara ay si ku talagal ah u faafiyaan?**

Ilaha wararka ama xogaha beenta ah soosaara ama faafiya waa kuwo arrinkaas u faafiya si ula kac ah. Badanaa hadafkoodu waa inay ku abuuraan fowdo, marinhabaabin iyo in fikirkooda gaarka ah ay ku hirgaliyaan. Wali ma is weydiisay sababta loo faafiyo wararka beenta ah? Yaase ka dambeeya ama ka faa'iida?

**Ilaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo waxaa ka mida kuwa dowladda iyo kuwa la yaqaanno.**

Marar badan wararka iyo xogaha beenta ah way adagtahay in laga garto kuwa runta ah. Si weyn uga digtoonow marinhabaabinta wararka iyo xogaha aan sugneyn. Ku dadaal la socodka wararka sugan ee warbaahinta lagu kalsoonaan karo..

**Wararka beenta ah si bareer ah ayaa loo faafiyaa!**

# KOBCI AQOONTAADA LA XIRIIRTA FAHAMKA WARBAAHINTA!

**Ma runbaa mise waa been in xataa warbaahinta lagu kalsoonyahay ay tabin karto warar been ah?**

Way dhici kartaa in mararka qaar in warbaahinta lagu kalsoonaan karo ay tabiso war been ah. Waxa dhici karta in si khaldan wax loo tabiyo, Laakiin haddii taasi dhacdo, markiiba waa la saxaa khaladka. Masuuliyiinta warbaahinta lagu kalsoonaan karo way ku degdeggaan inay khaladka saxaan.

**Warbaahinta lagu kalsoon karo waxay qaadaan masuuliyadda waxay tabiyaan.**

Wararka, xogaha iyo akhbaaraadka kala soco ilaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo. Kolba meeshaad joogto ku xirnow warbaahinta dhexdhedaadka ah ee tabisa wararka sugan ama la raadraaci karo. Kuwa caafimaadkana kala soco ilaha warbaahinta hay'adahaas.

**Ku xirnow ilaha warbaahinta lagu kalsoonaan karo!**

# KOBCI AQOONTAADA LA XIRIIRTA FAHAMKA WARBAAHINTA!

## Ma runbaa mise waa been in aysan suurtagal aheyn in la xaqiijiyo dhab ahaanta xogaha warbaahintu sheegto?

Xogaha warbaahinnadda lagu kalsoonaan karo ay sheeggaan waa la raadraaci karaa, waana wax sugan. Waxyaabaha ay faafiyaan ilaha aan la raadraaci karin lama aamini karo waana wax u badan been iyo marinhabaabin.

**Wixii macluumaad dheeri ah kala soo xiriir ururka Suomi-Somalia Seura www.suomisomaliaseura.fi**

Soosaarista: Mashruuca Caawinaad

## Ku samee raadraac wararka iyo akhbaaraadka ku soo gaara!

**Ururada ka wada shaqeeyey soosaarista macluumaadkan:**
https://suomisomaliaseura.fi/
https://mediakasvatus.fi/
https://vikes.fi/

**Ilo-wareedyada lagu kalsoonaan karo:**
https://thl.fi/fi/
https://www.who.int/
https://stm.fi/
https://valtioneuvosto.fi/
https://yle.fi/
https://www.hs.fi/

**Macluumaad dheeri ah:**
https://www.mediataitokoulu.fi/,
https://faktabaari.fi/